



## (Dikri waxaa u fadli badan: laa Ilaaha Ilaa Allah, ducuna waxaa u fadli badan: Alxamdu lilaah)

Jaabir Ilaahay ha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqley Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahaya: (Dikri waxaa u fadli badan: laa Ilaaha Ilaa Allah, ducuna waxaa u fadli badan: Alxamdu lilaah).

[Xadiis Xasan ah.] [Waxaa wariyay Ibnu Maajah.]

Nabigu scw wuxuu sheegay in dikriga ugu fadli badni yahay: laa ilaaha illallaah, oo macneheedu yahay: ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan Allah ahayn, ducana waxaa ugu fadli badan Al xamdu lillaah, waana qirid kan nicmada bixiyaa inuu Ilaahay yahay, isagaa xaq u leh in lagu sifeeyo wanaag oo dhan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3567>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

